Barnaamijka Barashada Faranjiga ee Carruurta Yaryar



Muxuu yahay Early French Immersion?

Early French Immersion waa mid deg-deg ah oo ah Barnaamij Luqadda Fransiiska oo ku bilaabmaysa Dugsiga Xannaanada caruurta soconaysana ilaa Fasalka 12aad Dhammaan hawlaha fasalka ee fasallada JK ilaa 3aad Waxaa lagu bixiyaa Faransiis. Maadada khaaska ah (sida, Caafimaadka iyo Waxbarashada Jimicsiga Jirka) waxaa laga yabaa in lagu barto Ingiriisi Fasallada 4aad ilaa 8aad, barnaamijka waxaa %50 lagu baran doonaa fransiis 50% na Ingiriisi. waxaa 50% lagu baran doonaa fransiis 50% na Ingiriisi.

Yaa codsan kara?

Dhammaan caruurta gelaysa Dugsiga Barbaarinta caruurta ee Hoose waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan Early French Immersion.

Yaa loogu talagalay Early French Immersion?

- ✓ Waxaa loogu talagalay qoysaska gurigooda kaga hadla luqad aan Fransiis ahayn.
- ✓ Waxaan aad u aaminsannahay in ardayda oo dhammi awoodaan inay bartaan luqad kale sidaas darteed ardayda nooc kasta oo waxbarasho ah iyo asal luqadeedba waa lagu soo dhawaynayaa laguna taageerayaa barnaamijka
- ✓ Barnaamijka Early French Immerssion wuxuu ku habboon yahay dhammaan qoysaska danaynaya fursad ay ku horumariyaan aqoontooda Faransiiska.



Faaiidooyinka Barnaamijka Early Immersion

Barnaamijka Early French Immersion wuxuu u oggolaada ardyda luqadday doonaan asalkoodu ha ahaatee inay si heer sare ah u horumariso aqoontooda Faransiiska Ku barashada luqad kale habkan waxay sidoo kale siinaysaa faa'iidooyin kale oo badan ardayda oo ay ku jiraan:

- ✓ Ku barashada luqad kale waxay caddaysay inay kor u qaaddo xirfadaha ardayga ee luqaddaiisa muhiimka ah.
- ✓ Barashada luqaddu waxay bixisaa faa'iidooyin kale oo garasho sida fikirka iyo xirfado waxbarasho oo aad u horumarsan oo ardaydu ku dabaqaan dhammaan qaybaha waxbarashadooda.
- ✓ Aqoonta wax ka badan hal luuqad waxay u furtaa albaabada fursadaha ardayda mustaqbalkooda waxayna kobcisaa wacyiga dhaqamada iyo aqoonsiyada kala duwan.
- ✓ Ardayda laba-luqadlayaasha ahi waxay horumariyaan xirfadaha wada xidhiidhka guud ahaan waxayna u baran karaan Luqado badan oo deeraad ah si fudud.

Macluumaadka Codsiga

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan barnaamijka Early French Immerssion iyo habka codsiga, fadlan booqo www.tdsb.on.ca/French.

Waqtigan xaadirka ah, daaqadda arjiga ee barnaamijka Early French Immerssion waa **Noofembar** sannad kasta. Fadlan tixraac website-ka horraanta Sebtembar wixii macluumaad ah ee ku saabsan wakhtiga kama dambaysta ah ee arjiga ee sannadka.

Waa muhiim inaad ogaatid marka meelaynta barnaamijku ay u diyaarsantahay dhammaan u qalmayaasha codsigoodu ku yimid xilligiisii, in meelayn dugsi khaas ahi **AYSAN** diyaarsnanyn.

www.tdsb.on.ca/French

Barnaamijka Barashada Faranjiga ee Carruurta Yaryar



Maxay Cilmi-baadhistu sheegtay?

"Ardayda FI waxay ku gaadhaan aqoon sare oo Faransiis ah iyo sidoo kale inay si fiican u yaqaanaan nuxurka dugsiga (Sayniska, Cilmiga Bulshada, Xisaabta iwm) oo u dhiganta ardayda la midka ah ee wax ku baranaysa Ingiriisida."

(Wesche, 2002)

Daraasado laga sameeyay qaybo kala duwan oo Kanada ahi ma helin wax saameyn xun ah oo ku yimid EFI ama MFI ardayda dugsiga dhexe oo ku saabsan xisaabta, sayniska iyo cilmiga bulshada marka lagu imtixaamo Ingiriisiga. (Wesche, 2002)

Inkasta oo laga yaabo in luqadda koowaad ee ilmahu aanay ahayn luqad bulsho, carruurtu waxay si guul leh u baran karaan luqad dheeraad ah, sida Faransiis, halka isku mar loo baranayo luqadda Ingiriisiga luqad labaad ahaan.

(O'Brien, 2017)

Xogtu waxay muujisay in ardayda ku jirta barnaamijyada French-Immersion ay kaga fiicnaadeen dhiggooda barnaamijyada aan immersionka ku jirin xagga fulinta wax akhriska. https://www150.statcan.gc.ca/n1/daily-quotidien/040322/dq040322a-eng.htm

Buugaagta

Wesche, M.B. (2002) Early French Immersion: How has the original Canadian model stood the test of time? An Integrated View of Language Development, Petra Burmeister, Thorsten Piske, and Andreas Rohde (Eds), WVT Wissenschaftlicher Verlag Trier.

www.fmks-online.de/_wd_showdoc.php?pic=865

Statistics Canada, (2004) Student Reading Performance in Minority Language Schools. https://www150.statcan.gc.ca/n1/daily-quotidien/040322/dq040322a-eng.htm

O'Brien (2017) Literature Review on the Impact of Second Language Learning, Canadian Association of Second Language Teachers.

www.tdsb.on.ca/French